

## **Daadku wuxuu Wasakhayn Karaa Ceelkaaga ama Ishaada Biyaha Burqanaya**

Kasoo qaad in biyahaagu wasakhoobeen haddii biyaha daadku gaaraan ceelkaaga ama ishaada biyaha ee burqanaysa, hana u isticmaalin cabitaan ahaan ilaa aad ka hubsato inaysan wax dhib ah keenayn. Biyuhu waxaa laga yaabaa inaysan ahayn kuwo ammaan u ah in la cabbo, wax lagu karsado ama wax lagu nadiifiyo daadadka kadib. Inta lagu jiro iyo kaddib daadadka, ceelasha gaarka loo leeyahay iyo ilaha biyaha waxaa wasakhayn kara bakteeriyyada, nooleyaasha il-ma aragtada ah iyo dhammaanba wasakhda ka timaadda bulaacadda/boosanerka, saliidda wax lagu kululeeyo, wasakhda beeraha ama warshadaha, kiimikooyinka, iyo waxyaabaha kale ee sababi kara xanuunada daran.

### **Daadka ka Agdhow Ceelkaaga ama Ishaada Biyaha**

Ha isticmaalin biyaha ceelkaaga ama ishaada biyaha ilaa laga baarayo lagana ogaanayo inaysan wax dhibaato ah keenayn, gaar ahaan haddii:

- Hore ugaareen ama haddaba dabooleyn biyaha daadadku ama ku yaallo meel ka agdhow daadka
- Waxa ay usoo urayaan qaab caraf leh ama ay usoo urayaan sida shidaalka ama kiimikooyinka, ama ay ka agdhowyihiin meel la tuhunsan yahay in uu shidaal ama kiimiko ku daadatay

### **Fiiri Nidaamkaaga Biyaha si aad u Ogaato inay Saamaynta Daadku soo Gaartay**

Haddii aadan tagin goobta inta daadku socday, ka raadi qashin iyo dhooqo goobta ku haray iyo wasakhda biyaha ama dhooqo dhex gashay ceelasha ama isha biyaha burqanaya. Kuwani waa calaamadaha muujinaya in nidaamkaaga biyaha daadku uu gaaray.

1. Haddii ay ammaan tahay samay sidan, qiimey qaybaha korontada:
  - Raadi waayaro/fiiloyin ama qaybo ka mid ah korontada oo waxyeeloobay/fiiqmay.
  - Eeg in wax biyo ah ay soo galeen qaybo ka mid ah korontada. Ha taaban fiilooyinka korontada.
  - Hadii fiilooyinka korontada ee xariirsan ama meelaha laga maamulo ee ku yaala ceelka banaankiisa ay biyuhu ka sare maraan, ha siraadin bamka ilaa biyaha daadku ay hoos u dagayaan.
2. Ka eeg qaybaha korontada ee nidaamka biyaha inta waxyeeloobay/halaawday.
  - Eeg daboolka ceelka - Daboolka ceelka oo qaloocda/dilaaca wuxuu u ogolaanayaa biyaha, dhegxaanta yaryar iyo qashinku inay soo galaan ceelka ayna sare u qaadaan khatarta wasakheynta.
  - Eeg daboolka ceelka oo xir si aad u xaqijiso inuu si wanaagsan oo dhuuqsan u xiran yahay. Dhegxaanta yaryar iyo qashinku waxay ceelka kasoo gali karaan daboolka ceelka haddii uu dabacsan yahay.
  - Waxaad qiimeysa mutuleylka sanduuqda iyo dhismaha agabyo si aad u aragto in uu xiran yahay una goobtiisuna fadhiyo.
3. Haddii nidaamkaaga biyuhu u muuqdo in si daran waxyeelo u gaartay, wac [ceel-qode shati havsta \(lifaqa waa Ingiriisi\)](#) ama [injineerka deegaanka \(lifaqa waa Ingiriisi\)](#).

4. Haddii shidaalka ama kiimikooyinka kulaylinta la ogaado inay ku qubteen meel u dhaw ceelkaaga ama durdurkaaga, wac [Maaraynta Qubashada ee Waaxda Deegan Dhowrka Vermont \(Department of Environmental Conservation, DEC\) \(lifaagu waa Ingiriisi\)](#) wakhtiga shaqadu socoto (7:45 a.m. - 4:30 p.m.) lambarka 802-828-1138 ama wakhtiga shaqadu aysan socon 800-641-5005 si aad u soo tabiso/wargeliso qubashada. **Ha cabbin biyaha** haddaad ka shakido in shidaal ama kiimiko qubatay saamaysay biyaha ceelkaaga ama haddii ceelkaagu leeyahay ur udgoon ama sida shidaalka ama kiimiko.
5. Sidoo kale waxa dhici karta inaad dhibaato ku qabto nidaamkaaga bullaacadaha. [Raadi khayraad kaa caawiyo nidaamkaaga bullaacadaha](#). Linkiyada boggan ku yaalaa waxay kuu gaynayaan khayraad. Si aad ugu hesho macluumaad luuqad kale, kala xiriir Wakaaladda Khayraadka Dabiiciga ah [ANR.CivilRights@vermont.gov](mailto:ANR.CivilRights@vermont.gov) ama 802-636-7827.

## **Haddii Ceelkaaga ama Ishaada Biyaha Burqanaya uu Daadku Saameeyo**

Bakteeriaydu waa waxa ugu badan ee wasakheeya biyaha la cabbo marka laga tago cuntada. Bakteeriaydu waxay kuu keeni kartaa jirro. Ha cabbin biyahaaga ilaa aad tijaabiso.

1. Ilaa biyahaaga la tijaabiyo oo natijjooyinkuna muujiyaan in bakteeriayda coliform iyo E. coli ay "aysan ku jirin," **ha u isticmaalin biyahaaga walxahan:**
  - Cabitaan
  - Raashin karin
  - Dhaqista maacuunta/alaabta
  - Diyaarinta sharaabka ama barafka
  - Dhaqista miraha iyo qudaarta
  - Cadayidda ilkaha
  - Diyaarinta caanaha caruurta (baby formula)
2. Ka hel biyaha il la yaqaano oo ammaan ah.
  - Ka buuxso weelasha cuntada ee ammaanka ah biyaha aad ka helayso illo ammaan ah, sida maktabadda magaalada, xarunta degmada, waaxda dab-damiska, dugsiga, kaniisadda ama xaafiiska magaalada.
  - Soo iibso biyaha dhalooyinka kujira.
  - Ka iibso biyaha gawaarida waaweyn ee biyaha/booyadaha kana buuxso taangiga biyaha. Hel [liis ah booyadaha biyaha ee waawayn \(lifaagu waa Ingiriisi\)](#) ama ka raadi internetka "bulk water haulers Vermont."
  - Haddii aadan biyo ka heli karin meel badbaado/amaan leh oo la yaqaan, **karkari biyahaaga muddo hal daqiqo ah** si aad u disho bakteeriayda iyo jeermiska kale ee biyaha ku jiri kara. Ha karkarin biyaha haddii:
    - Ka uriso ama aad ku aragto calaamadaha kiimikooyinka biyahaaga
    - U malaynayso in uu jiro shidaal ama kiimiko ku daadatay meel ka agdhow
    - Aragto in biyuhu xunbo leeyihiin ama ay ka buuxaan dhegxaan yaryar.
  - **Ha ka** buuxin ceelkaaga ama ishaada biyaha burqanaysa ee wasakhowday biyaha ay kuu keenaan gawaarida waaweyn ee biyaha/booyadaha. Taa badalkeeda, ku shubo biyaha weelasha cuntada ee ammaanka ah.

## **Sida aad u Tijaabinayso Biyaha aad Cabto**

1. Ka wac Shaybaarka Waaxda Caafimaadka lambarka 802-338-4724 si aad uuga dalbato qalabka tijaabada bakteeriyyada oo \$14 qiimahiisu yahay.
2. Kahor inta aadan qaadin muunad/tijaabada biyo ah:
  - Ka saar wixii aad arki karto oo dhoobo, heehaab, iyo uskag/wasaq kale ah weelka ceelka ama gudaha sanduuqa durdurka.
  - Haddii biyahaagu dhooco ama cawlaan yihiiin, biyaha ku sii daa qasabad dibadda ah oo tuumbo ku xiran tahay ilaa biyuhu saafi ka noqonayaan oo uskaggu ka ba'ayo. Tani waxay qaadan kartaa 30 daqiiqo ilaa dhawr saacadood ama maalmood, iyadoo ay ku xiran tahay xajmiga iyo qotada ceelka ama durdurka iyo heerka wasakhda.
3. Raac tilmaamaha qalabka tijaabada si aad u qaaddo muunadda/tijaabada. Hubi inaad qaadayso muunadda/tijaabada isla maalinta aad soo celinayso.
4. Ku soo celi muunadda/tijaabada Shaybaarka Waaxda Caafimaadka ama xafiiska caafimaadka deegaanka ee kuugu dhaw Isniinta ilaa Khamiista. [Hubi jadwalka \(lifaagu waa Ingiriisi\)](#) si aad u ogaato marka muunadda/tijaabada la rabo in la soo celiyo.
5. Wuxaa ku helaysaa natijjooyinka bakteeriyyada laba maalmaha shaqada ah gudahooda.
6. **Ilaa natijjooyinka tijaabodu ay muujiyaan in bakteeriyyada total coliform iyo E. coli "aan laga helin," biyaha ha isticmaalin.** Biyaha ka soo dhaanso meel badbaado ah oo la yaqaan ama karkari hal daqiiqo kahor inta aadan isticmaalin.

## Kadib Marka Aad Hesho Natijjooyinka Biyahaaga

- Haddii natijjooyinkaagu muujiyaan in bakteeriya "laga helay," [raac tilmaamaha si aad jeermiska uga disho ceelkaaga ama durdurkaaga \(lifaagu waa Ingiriisi\)](#) kadib marka biyaha daadka ah ay dhammadaan. Haddaad u baahan tahay caawimo jeermis ka dilidda ceelkaaga ama durdurkaaga, la xiriir [ceel-godaha deegaanka \(lifaagu waa Ingiriisi\)](#) ama [khabir tavada biyaha ah \(lifaagu waa Ingiriisi\)](#).
- Kadib markaad jeermiska ka dilayso ceelkaaga ama durdurkaaga, mar kale ka baar biyahaaga bakteeriya 2 ilaa 3 maalmood kadib marka urta kaloriintu baaba'do. Ka wac Shaybaarka Waaxda Caafimaadka lambarka 802-338-4724 si aad uga dalbato qalabka tijaabada bakteeriyyada oo \$14 qiimahiisu yahay.



# Flooding Can Contaminate Your Well or Spring

Assume your water is contaminated if floodwater has reached your well or spring, and do not use it for drinking until you know it is safe. Water may not be safe to use for drinking, cooking or cleaning after a flood. During and after flooding, private wells and springs can become contaminated with bacteria, microorganisms and other pollutants from sewage, heating oil, agricultural or industrial waste, chemicals, and other substances that can cause serious illness.

## Flooding Near Your Well or Spring

**Do not use the water from your well or spring until you have it tested and you know it's safe**, especially if:

- It was or is covered with floodwaters or located near flooding
- It smells sweet or smells like fuel or chemicals, or is near a suspected fuel or chemical spill

## Inspect Your Water System for Flood Impacts

If you did not see the area during the flood, look for debris and mud in the area and water or mud stains on the well or in a spring. These are signs that your system was flooded.

1. If it is safe to do so, inspect electrical components:
  - Look for exposed/damaged wiring or electrical components.
  - Check whether water entered any electrical components. Do not touch electrical wires.
  - If electrical connections or controls located outside the well casing or spring box remain submerged, do not turn on the pump until the floodwater has gone down.
2. Check for damaged structural components of the water system.
  - Check the well casing - A bent/cracked well casing may allow water, sediment and debris to enter the well and increase the risk of contamination.
  - Check the well cap and seal to make sure they are securely fastened to the well casing. Sediment and debris may enter the well through a loose well cap.
  - Inspect spring box tiles and structural components to see if they are sealed and stayed in place.
3. If your water system appears severely damaged, call a [licensed well driller](#) or your [regional engineer](#).

4. If heating fuel or chemicals are known to have been spilled near your well or spring, call the [Vermont Department of Environmental Conservation \(DEC\) Spill Management](#) during business hours (7:45 a.m. - 4:30 p.m.) at 802-828-1138 or outside business hours at 800-641-5005 to report the spill. **Do not drink the water** if you suspect a fuel or chemical spill has impacted your well or if your water smells sweet or like fuel or chemicals.
5. You may also be having problems with your septic system. [Find resources to help you with your septic system](#). The links on this page go to resources. To get information in another language, contact the Agency of Natural Resources at [ANR.CivilRights@vermont.gov](mailto:ANR.CivilRights@vermont.gov) or 802-636-7827.

## If Your Well or Spring Has Been Affected by Flooding

Bacteria are the most common drinking water contaminants after a flood. Bacteria can make you sick. Do not drink your water until you have it tested.

1. Until your water has been tested and your results show total coliform and E. coli bacteria were "not detected," **do not use your water** for:
  - Drinking
  - Cooking
  - Washing dishes
  - Making juice or ice
  - Washing fruit and vegetables
  - Brushing teeth
  - Preparing baby formula
2. Get water from a known safe source.
  - Fill food-safe containers with water from a known safe source, like the town library, town hall, fire department, school, church or town office.
  - Buy bottled water.
  - Buy water from a bulk water hauler and fill up a water tank. Find a [list of bulk water haulers](#) or search the internet for "bulk water haulers Vermont."
  - If you can't get water from a known safe source, **boil your water for one minute** to kill bacteria and other microorganisms that may be in the water. Do not boil water if you:
    - Smell or see signs of chemicals in your water
    - Think there was a nearby fuel or chemical spill

- See that the water is cloudy or full of sediments.
- **Do not** fill your contaminated well or spring with water delivered by a water hauler. Instead, keep the water in food-safe containers.

## How to Test Your Drinking Water

1. Call the Health Department Lab at 802-338-4724 to order a bacteria test kit for \$14.
2. Before taking a water sample:
  - Remove any visible mud, sediment, and other debris from around the well casing or from within the spring box.
  - If your water is muddy or cloudy, run the water from an outside spigot with a hose attached until the water becomes clear and free of sediments. This may take 30 minutes to several hours or days, depending on the size and depth of the well or spring and extent of contamination.
3. Follow the instructions in the test kit for taking the sample. Make sure you are taking the sample the same day you are returning it.
4. Return the sample to the Health Department Lab or the closest local health office Monday through Thursday. [Check the schedule](#) to see when the sample needs to be returned.
5. You should receive your bacteria results within two business days.
6. Until the test results show that total coliform and E. coli bacteria were "not detected," do not use the water. Get water from a safe known source or boil it for one minute before using it.

## After You Receive Your Water Results

- If your results show that bacteria were "detected," [follow steps to disinfect your well or spring](#) after the floodwater has gone down. If you need help disinfecting your well or spring, contact a [local well driller](#) or [water quality expert](#).
- After disinfecting your well or spring, retest your water for bacteria 2 to 3 days after the smell of chlorine is gone. Call the Health Department Lab at 802-338-4724 to order a bacteria test kit for \$14.